

UNITED NATIONS



NATIONS UNIES

**Office of the United Nations Resident & Humanitarian Coordinator for Somalia**

Springette, Off Lower Kabete Road, P.O. Box 28832, 00200, Nairobi, Kenya

Tel. (254 20) 4255000; Fax (254 20) 4255101 Website: [www.unctsom.org](http://www.unctsom.org)

---

## **Qaramada Midoobey oo ku dhawaaqdey in macluul ay ka jirto Soomaaliya**

(Nayroobi, 20<sup>ka</sup> Luuliyo 2011): Qaramada Midoobey ayaa maanta ku dhawaaqdey in macluul ay ka jirto laba gobol oo ka tirsan koonfurta Soomaaliya: oo kala ah koonfurta Bakool iyo Shabeellaha Hoose. Guud ahaan dalka, ayaa ku dhowaad kalabar dadka Soomaaliyeed – ama 3.7 milyan oo qof – ay waqtigan dhibaatooyin ku haystaan, kuwaas oo qiyaastii 2.8 milyan qof oo ka mid ahi ay ku nool yihiin koonfurta dalka.

Abaaro is-dabajooq ah ayaa dalka saameeyey dhowrkii sano ee la soo dhaafey halka dagaalka socda uu aad ugu adkeeyey in hay'adaha gargaarka ay shaqeeyaan oo ay gaaraan bulshooyinka ku nool koonfurta dalka.

Jiritaanka xaalad macluuleed ayaa lagu dhawaaqaa marka heerarka nafaqo-xumada carruurta ay dhaafaan 30 boqolkiiba; in ka badan 2 qof ayaa maalin kasta ka dhinta 10,000 ee qofba; dadkuna ma heli karaan cunto iyo waxyaabaha kale ee daruuriga ah.

Mark Bowden, oo ah Xiriiriyaha Hawlaha Bani'aadamnimada ee Soomaaliya, ayaa ka dhawaaqiyey in heerarka nafaqo-xumadu ay haatan yihiin kuwa ugu sarreeya dunida oo dhan, halka heerarkaa kuwa ugu sarreeya ay 50 boqolkiiba gaarayaan degaanno ka tirsan koonfurta Soomaaliya. Koonfurta Bakool iyo Shabeellaha Hoose, ayaa heerarka nafaqo-xumada ba'an ay dhaafayaan 30 boqolkiiba, iyada oo carruurta shan sano jirka ka yar ee dhimaneysa maalin kasta ay degaamada qaar ka badan yihiin 6 ka mid ah 10,000 ee carruur ahba. Dhowrkii bilood ee la soo dhaafey, ayaa tobonaan kun oo Soomaali ah ay u dhinteen sababo la xiriira nafaqo-xumo, kuwaas oo badidoodu ay ahaayeen carruur.

“Haddii aanan hadda tallaabo qaadin, waxaa ay macluushu ku faafi doontaa dhammaan siddeedda gobolka ee koonfurta Soomaaliya muddo laba bilood gudahooda ah, taasna waxaa u sabab ah dalagga soo go'aya oo yar iyo cudurro faafa oo dillaaca,” ayuu yiri Mudane Bowden. “Ilaa hadda ma wada hayno dhaqaalihii aan kala soo bixi lahayn cunto, biyo nadiif ah, hoy iyo adeegyo caafimaad si aan u badbaadinno nolasha boqollaal kun oo Soomaali ah oo baahi adag ay hayso,” ayuu hadalkiisa ku darey.

Isla waqtigan, dhaqaale la'aanta jirta ayaa ah mid welwel badan leh. “Maalin kasta oo aan la daahno gargaarka waxaa uu micnaheedu yahay in ay dhimanayaan dad bani'aadam ah oo aan waxba galabsan,” ayuu yiri Bowden.

In kasta oo hay'adaha bani'aadamnimada ee Qaramada Midoobey ay soo dhoweeyey baaqii Al Shabaab ay ku codsaneysey in gargaar caalami ah la soo gaarsiiyo koonfurta Soomaaliya, haddana hay'adaha cuntada oo aaney u sooroobin inay ka shaqeeyaan gobolka tan iyo horraantii 2010<sup>kii</sup> ayaa Qaramada Midoobey ka hor-istaagey in ay gaarto dadka ay gaajadu hayso – gaar ahaan carruurta – taas ayaana qayb ahaan ay ka dhalatey dhibaataada haatan taagan.

In kasta oo ay culaysyo jiraan, haddana hay'adaha bani'aadamnimadu waxaa ay aad ugu dadaalayaan in ay wax ka qabtaan dhibaataada. Dadaal ay ku doonayaan in ay carruur badan oo kale ay la gaaraan

waxqabadyo nafaha lagu badbaadinayo, ayaa Qaramada Midoobey iyo la-hawlgalayaasheedu waxa ay kor u qaadeen dadaallada ku aaddan nafaqada degdegga ah, biyaha iyo fayadhowrka, iyo tallaalka si ay ula dagaallamaan nafaqo-xumada ayna hoos ugu dhigaan cudurrada. Si loo dedejiyo sahayda la geynayo degaamada dhibaatadu sida ugu xun ay u taabatey, ayaa Qaramada Midoobey waxaa ay bilowdey in ay diyaarado ku duuliso sahayda daawada, nafaqada iyo biyaha ee degdegga loogu baahan yahay.

Degaamada Soomaaliya ee dhibaatadu ay sida ugu weyn u taabatey waa kuwa koonfurta, gaar ahaan gobollada Shabeellaha Hoose, Jubbada Dhexe iyo Jubbada Hoose, Baay, Bakool, Banaadir, Gedo iyo Hiiraan, kuwaas oo ay ku nool yihiin carruur 310,000 lagu qiyaasey oo ay nafaqo-xumo hayso.

Ku dhowaad kalabar dadweynaha ku nool Soomaaliya waxaa haysta dhibaatooyin bani'aadamnimo waxaana ay degdeg ugu baahan yihiin gargaar. Tirada dadka ay dhibaatooyinku haystaan ayaa hal milyan oo qof oo kale ay ku darsantey lixdii bilood ee ugu dambeeysey. In ka badan 78,000 qof oo Soomaali ah ayaa labadii bilood ee ugu dambeeyey ka soo cararey dalka si ay gargaar iyo magangelyo ugu helaan dalalka deriska la ah Soomaaliya, iyada oo 61,000 ay soo carareen bishii Juunyo oo keliya – tiradaan oo ka badan wadarta guud ee kuwii soo cararey muddadii u dhaxaysey Jannaayo ilaa Abriil (taas oo ahayd 59,000).

“Dadka Soomaaliyeed maanta ayaa ay ugu baahi badan yihiin ayna ugu mudan yihiin in dareen buuxa loo lahaado. Waa in dhammaan kooxaha dagaalladu u dhexeeyaan ay wadajir uga shaqeeyaan in ay waqtigan badbaadiyaan nafaha dadkooda Soomaaliyeed,” ayuu yiri Bowden.